

Sharciga lamba. 6 ee 28 Disembar 1971.

Canshuurta Dakhliga Dhismayaasha – Wax ka Baddalka Buugga Qura ee Canshuurta Tooska.

GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada Dawladda;

Marka uu arkay oggolaashaha Golaha sare Kacanka;

WUXUU MEELMARIYAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Qiimaha Canshuurta Daqliga Canshuurta Dhismayaasha

1. Qod. 37 Buugga Qura e Canshuurta Tooska, ee lagu meelmariyay Dekereetada Baarlamaanka 5 Nofembar 1966, lamba. 5, waxaa loo baddalay sida soo socota:
“ Cansuurta dhismayaasha ee ku xusan qod. 12 xarafka e) iyo qod. 23 laguma biiri karo canshuurta caynta kale waxaase la saarayaa canshuur gooniya oo ah wax u dhigma 22,50%”;
2. Sida uu qabo qod. 39 Xeerka Qura, waxaa u sugnaaday Maamulka Dawladda Hoose, dheeraad u dhigma lix meelood meel canshuurta dakhliga dhismayaasha.

Qod. 2

Caddaynta

1. Canshuurta laga doonayo dhismayaasha waa in la caddeeyaa oo lagu bixiyaa saddex-biloodle, inta lagu jiro bisha ku xigta saddex bilodlaha, xaafiiska canshuuraha tooska ama xaafiisyada qaybaha canshuuraha gobollada iyo degmooinka shaqada ku leh.
2. Bixiyeyaasha waxay iqtiyaar u leeyihiin bille ama saddex-biloodle in ay ku caddeeyaan canshuurta ku xusan faqradda sare.

Qod. 3

Fasiraadda Dhabta

1. Arrimaha fasiraadda Buugga Qura ee Xeeke Canshuurta Tooska, ee Xeerka 29 Maarso 1971, lamba. 27 iyo Xeerkaan “dhismayaasha iyo dhisma kasta oo taagan” oo la canshuuro, waa in ay ahaadaan sar idil ahaantood oo aan ahayng sofiito;
2. Dhismayaasha kale lama saarayo canshuurta dakhliga waxase laga qaadayaa canshuurta joogta ah ee degitaanka caadiga ee Maamulka Dawladda Hoose, ee ku xusan Dekereetada Baarlamaan 9 Juun 1965, lamba. 1 Xeerka 29 Maarso 1971, lamba. 27;
3. Canshuurta joogtada ee degitaanka caadiga ee ku xusan faqradda sare, waxaa la saari karaa dhismayaasha aanay saarnay canshuurta daqliga.

Qod. 4

Waaxa la laalay xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la jaan qaadayn Xeerkaan.

Qod. 5
Xeerarka kala Guurka

1. Dakhliga dhismayaasha la sameeyay ama la helay 1972 waa in la caddeeyaa saddexdii biloodba.
2. Daqliga Canshuurta dhismayaasha la sameeyay ama la helay sandaka 1971 waa in lagu caddeeyaa inta lagu jiro 31 Maarso 1972 caddaynta qura ee sanadlaha, si waafaqsan Madaxa IV ee Buugga Qura ee Xeerka Canshuurta Tooska.

Qod. 6
Dhaqan Gal

1. Xeerkaan deg-deg ayuu u dhaqangalayaa waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga;
2. Xeerkaan waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeererka iyo Dekeretooyinka Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaliya;
3. Cid kasta waxaa ku waajiba in ay u hoggaansanto oo ilaaliso ka xeer Dawladeed ahaan.

Muqdisho, 28 Disembar 1971.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre